

IIB MAGALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 30ka Djsember 1986 Lr. 3 R 12

## JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **BUKUNKA:** Sannadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedaana waa Sh. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halhalki sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qortitaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faaifinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

### K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 31 ee 2 Dis. 1986, Oggolaansho Heshiisyo dhexmaray Hay'adda Horumarinta Caalamiga, J.D.S. iyo Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed

Bog; 856

QAYBTA

LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 36 ee 30 Okt. 1986, magacaabid Nootaayo

»

857

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 37 ee 30 Okt. 1986, Magacaabid Nootaayo

»

858

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 38 ee 1 Sebt. 1986, Kordhin Ujuuradaha bixinta Sumadaha Baabuurta, Rimoorkiyada iyo Dhugdhuuyaasha

»

859

QAYBTA LABAAD

**XEER**

Keer Madaxweynaha J.D.S. Lambar 36 taariikh 30 Oct. 1986 Magacaabid Nootaayo.

**MADAXWEYNAHA JDS**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 82aad ee Dastuurka.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga lambar 8 ee 15.2.61 iyo Sharciga lambar 1 ee 2.3.62, kuna saabsan habeynta hawsha Nootaayada.

**MARKUU TIXGELIYEY:** In J/yaasha hoos ku qoran oo horay uga tirsanaan jiray W. Garsoorka iyo Arimaha Diinta, kuna shaqayn jiray Nootaayenimo, ay doorteen in ay shaqada Dowladda istiqaal ka keenaan, siina wataan hawlaha nootaayenimada, iyagoo ka faa'ideysa naya xaqa kala doorashada ee ku tilmaaman god. 3aad Sharciga lambar 7 ee 2dii Febraayo 1986.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Soojeedinta Wasiirka Wasaarada Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga Soo Socda:

Qodobka laad

Jaaljayaasha hoos ku qoran waxaa loo magacaabay **NO. TAAYO**, waxayna hawlahooda ka fulinayaan magaalada mid walba magaciisa ku hor qoran:

1. Dr. Muuse Xuseen Saddiq Xamar.
2. Dr. Maxamuud Xuseen Diirshe Xamar.
3. Dr. Muumin Axmed Abuukar Xamar.
4. Dr. Cabdi Muuse Mayow Xamar.
5. Dr. Maxamed Xaaji Saciid Xamar.
6. J/le Saciid Axmed Ismaaciil Hargeysa.

Qodobka 2aad

Xeerkanj wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Oct, 1986.

**MADAXWEYNAHA J.D.S.**

Maxamed Siyaad Barre

30 XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 37 ee ~~21-63~~, kuna saab.  
Oct. 1986 Magacaabid Nootaayo.

### MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 8 ee 15.2.61 iyo Sharciga lambar 1 2.3.62, kuna saabsan habeynta hawsha Nootaayada.

MARKUU ARKAY: Qod. 2aad sharciga lambar 7 ee 2dij Feb. 1986, oo awoodda u alinaya Madaxweynaha J.D.S. in uu toos iyo tartan la'aan u magacaabo Nootaayo qofkii mudan.

MARKUU TIXGELIYEY: In J/yaasha kala ah Cabdiraxmaan Cilmi Cigaal, Cusmaan Nuur Cali Qonof iyo Sh. Maxmed Maxam d ay muddo dheer ka soo shaqeeyen Garsoorka Dalka J.D.S. Aqoonna ay u leeyihiin shuruudaha Dalka, hawlaha Nootaayinmadana ay si habboon u gudan karaan.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

### WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Sooda:

#### Qodobka laad

Jaallayaashu hoos ku qoran waxaa loo magacaabay NOTAAYO, waxayna hawlahaada ka fulinayaan xafiisya na ka furanayaan magalaada Muqdisho.

1. Dr. Cabdiraxmaan Cilmi Cigaal.
2. Dr. Cusmaan Nuur Cali Qonof iyo
3. Jaalle Sheekh Maxamed Maxamuud.

#### Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 OCT. 1986.

MADAXWERNHAHA J.D.S.